# Statens barnehus

## Warbixin dadka waaweyn loogu talagalay

# Waraysiyda booliska ee la fududeeyay ee ka dhacay Xarunta carruurta

Haddii la qabo shaki ku saabsan in carruur ama qof weyn oo si gaar ah u nugul loo geystay ama uu markhaati ka ahaa xadgudubyo jinsiyeed, tacadi ama faldembiyeedyo kale, waxa boolisku qaadi doonaan waraysi boolis oo la fududeeyay. Dadka waaweyn ee si gaar ah u nugul waxa laga wadaa dadka qaba dib u dhac garaad ama awoodoodu si kale u hoosayso oo markaa u baahan in loo fududeeyo waraysiga booliska.

Waraysiga boolis ee la fududeeyay waxa lagu qabanayaa Xarumaha-qarmeedka ilmaha dhiban [Statens barnehus], oo ah goob ammaan ah oo carruurta iyo dadka waaweyn ee nuguli ku sheegi karaan wixii dhacay iyagoo jooga meel ammaan ah oo ku habboon xaaladooda.

# Xeerarka uu ku salaysan yahay

Xeerka Habraaca Kiisaska Ciqaabta § 239 ayaa maamulaya qaabka loo qabanayo waraysiga boolis ee la fududeeyay. Si qofka looga qaado waraysi boolis oo la fududeeyay waa in marka hore dacwad loo gudbiyo booliska. Dembi-baadhista ayay ka mid tahay in boolisku waraysto carruurta ama dadka waaweyn ee nugul ee laga yaabo in loo geystay ama ay ka markhaati ahaayeen dhacdooyin xun.

Markhaatiyada lagu waraysanayo Xarunta carruurta waxa waajib ku ah inay booliska siiyaan warbixin, si la mid ah maxkamadaha. Waraysiyada booliska waxa hogaaminaya qof xeerilaaliye ah oo ka masuul ah ilaalinta in lagu dhaqmo xeerarka jira.

Waxa Xeerka Habraaca Kiisaska Ciqaabta § 239 b ku xusan in boolisku ay waraysiga koowaad ee la fududeeyay ku dhaqaaqi karaan iyada oo aan la ogeysiinin qofka dembiga lagu tuhunsan yahay. Kiisaska uu boolisku tuhmayo in hal ama labada waalid sameeyay faldembiyeed waxa ilmaha la waraysanayaa iyada oo aan loo sheegin waalidka.

## Ma`suul iyo qareen dhibbane

Inta kiisku socdo waxa ilmaha ama qofka weyn ee nugul inta badan loo qabtaa mas`uul ku meel gaadh ah ama qareen dhibbane oo ilaalinaya xuquuqdooda. Dawladda ayaa bixinaysa lacagta ku baxaysa.

## Waraysiga boolis ee la fududeeyay

Si ilmaha ama qofka weyn ee nugul loo ilaaliyo sida ugu wacan waxa waraysiga lagu qabanaya Xarunta carruurta. Waraysiga waxa loo qabanayaa qaab ku habboon xaaladda qofka. Xarunta carruurta waxa ka shaqeeya boolis iyo dad kale oo ku takhasusay kiisaska noocan ah. Boolisku ma wato dharka booliska, islamarkaana Xarunta carruurtu ma u ee ka saldhig boolis. Inta waraysigu socdo waxa la qaadan doonaa biririfyo waxaana qofka la siinayaa cunto. Turjubaan ayaa la isticmaali doonaa haddii loo baahdo.

## Fiidyow

Waraysiga booliska ee la fududeeyay waxa lagu qabanayaa qol ay yaalaan maykarafoon iyo kaamarad. Maqalka iyo muuqaalka wadahadalka waxa loo gudbinayaa qol kale oo ay joogaan booliska, qareenno iyo dad kale oo ka shaqeeya Xarunta carruurta. Waraysiga waxa hogaaminaya sharci-yaqaan ka tirsan xeerialintа. Hay'adda daryeelka caruurta ayaa iyaguna inta badan yimaada oo la socda kiiska.

## Baadhitaan caafimaad oo ay samaynayaan dhaktarka iyo dhakhtarka ilkuhu

Dembi-baadhista kiiska darteed waxa mararka qaar loo baahan karaa in dhakhtar ama dhakhtar ilko ay baadhaan ilmaha ama qofka weyn ee nugul. Baadhitaanku wuxuu ka dhacayaa Xarunta carruurta.

## Yaa keenaya Xarunta carruurta?

Booliska ayaa diyaarinaya qof weyn oo lagu kalsoon yahay ama qof mas`uul ah oo qofka la waraysanayo u raaca Xarunta carruurta. Inta badan waa qof ka mas`uul ah daryeelka qofka ama qof kale oo qofka la waraysanayo uu hore u yaqaanay. Qofka wehelka ah waa loo sheegayaa waxa kiisku ku saabsan yahay, laakiin ma loo faahfaahin doono islamarkaana looma sheegi doono waxa ilmaha ama qofka weyn ee nugul uu sheegay.

## Hay'adda daryeelka carruurta

Marka boolisku baadhayo kiisaska ay waalidku ka mid yihiin dhinacyada kiiska, waxa la ogeysiinayaa Hay'adda daryeelka carruurta. Hay'adda daryeelka carruurtu inta badan way joogtaa Xarunta carruurta marka la qaadayo waraysi boolis oo la fududeeyay. Iyagu markasta ilmaha ma la kulmaan, laakiin waraysiga way la socdaan iyagoo jooga qol kale. Hay'adda daryeelka carruurtu marka dambe ayay la soo xidhiidhi doontaa qoyska.

## Waraysiga kadib

Dad badan ayaa ku daala waraysiga. Booliska iyo Xarunta carruurtu waxay ku talinayaan in aan ilmaha ama qofka weyn ee nugul aan la weydiinin wixii ay booliska u sheegeen, maadaama arrintaasi ay culays ku keeni karto. Haddii qofku iskii uga sheekeeyo wixii uu sheegay, waa la dhegaysan karaa.


Su'aalaha ku saabsan waraysiga iyo shaqada booliska ee kiisku ma aha waxay ka jawaabi karaan Hay'adda daryeelka carruurta ama wehelkii u soo raacay Xarunta carruurta. Su'aalaha oo dhan waxa si toos ah loo weydiin karaa booliska.

## La socoshada Xarunta carruurta

Waraysiga ka dib waxa la samaynayaa u kuurgelid kooban oo ku saabsan baahida loo qabo la sii socosho. Xarumaha carruurta waxa laga heli karaa u kuurgelidda dhibaatooyinka nafsadeed, wadahadallo taageero ah ama daawayn la xiriirta xadgudbyada jinsiyeed iyo tacadiga qofka ku dhacay. Xarunta carruurtu wuxuu qofka u sii gudbin karaa adeegyada la socoshada ee ka jira meesha uu deggan yahay. Adeegyadani waa lacag la'aan.

# Xarumaha-qarmeedka ilmaha dhiban [Statens barnehus] halkee waddanka kaga yaalaan?

Xarumaha-qarmeedka ilmaha dhiban [Statens barnehus] waxay ku yaallan 11 ka mid ah magaalooyinka Norway. Kuwaasoo ah **Bergen, Bodø, Hamar, Kristiansand, Moss, Oslo, Sandefjord, Stavanger, Trondheim, Tromsø iyo Ålesund. Qaar ka mid ah xarumaha carruurta ayaa laamo ku leh magaaloyin kale. magaaloyin kale.**



POLITIET

STATENS BARNEHUS
Et tverrfaglig kompetansehus